

Laynka Mawduuca: Xogta Cusub Fernwood

Qoysaska iyo Shaqaalaha Fernwood ee Qaaliga ah,

Waxaan warqadaan kuugu soo qoraynaa inaan kula socodsiino horumarka laga gaaray nadiifinta sunta ee aagaga dugsiga Fernwood Montessori. Nadiifin dheeraad ah ayuu sameeyay saakay Dugsiyada Dadwaynaha Milwaukee gaar ahaan afar aag oo gaar ah. Degmadu waxay sugeysaa falanqeynta dib u baaritaanka afartaan aagg waxaana sameeyay Waaxda Caafimaadka Magaalada Milwaukee.

Waaxda Caafimaadka ee Magaalada Milwaukee ayaa nagu soo wargelisay fiidkii Isniinta in afar ka mid ah 60 kii baaritaan ee Fernwood ay u baahdeen in dib loogu sameeyo tijaabo Talaadada, ka dib nadiifinta dheeraadka ah.

Ardayda iyo shaqaaluhu waa inay sii wadaan inay iska xaadiriyaan Dugsiga Dhexe ee Douglas ilaa inta si kale wax loogu sheegaayo. Marka dhismaha Fernwood loo fasaxo in yimaado, shaqaalaha waxaa la siin doonaa maalin buuxda si ay ugu hagaajiyaan fasalada sidii loo qorsheeyay iyo si ay usoo dhaweeyaan ardayda maalinta xigta.

Badqabka ardaydeena iyo shaqaalaheena waa mudnaanta koowaad. Kaliya ka dib marka waaxda caafimaadku nadiifiso dhismaha ayay ardayda iyo shaqaalaha loo oggolaan doonaa inay galaan Fernwood.

Wixii xogo ah oo cusub waxaan kula socod siin doonaa sida ugu dhaqsaha badan marka aan xog oggaano. Waad ku mahadsan tahay dulqaadkaaga inta aan sii wadeyno shaqada hubinta badqabka goobta ee guud ahaan Fernwood.

Daacadnimo,

Xafiiska Maamulka Dugsiga